



**UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO 2 BOOS OO BANAAN (AHNA DHUL GOOF AH)**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 03/11/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

<b>ISKA IIBIYE:-</b> C/QAADIR MAXAMUUD CARAB MAXAMUUD Somali ah Hooyo: Faadumo Cali Jimcaale, Somali ah, Ku Dhashay: X/dheere, Sanadkii: 1987, Degan Muqdisho, Sita: License, Lr. 42075. <b>DAMIINUL MAAL:-</b> ABDINASIR AHMED ALI, Sita: Somali Passport, Lr. P01087836.	<b>IIBSADE:-</b> OMAR ABDULLAHI ARAB, Hooyo: Fadumo Jimcaale Maxamed, Somali ah, Ku Dhashay: X/dheere, Sanadkii: 1982, Sita: Kaarka Aqoonsiga Qaranka, Lr. 37693036806
<b>TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO</b> Dhul Banaan oo Ku yaal: <b>Muqdisho</b> , Degmada: <b>(Dayniile)</b> , Cabirka: <b>(20X30)-M</b> , Looto No: <b>79-80-H</b> , W.M.L: <b>(1932/T.P.N/25)</b> , Tr. 03/11/2025, Kana Soo Baxay Nootaayo Tayo, Uuna Saxiixay Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed	<b>SOOHDINTA DHULKA</b> Bari: <b>Jid</b> , Koonfur: Dhul dad, Galbeed: <b>Jid</b> , Waqooyi: <b>Jid</b> <b>QIIMAHA DHULKA:</b> USD \$13,000 (Toban iyo Sadax Kun oo Doolarka Mareykanka ah).

**B-** Aniga oo ah **C/QAADIR MAXAMUUD CARAB MAXAMUUD**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda Iyo Caqligaba ka fiyoow Cid I qasabtayna Aysan Jirin in aan ka gaday kuna wareejiyey **OMAR ABDULLAHI ARAB** Dhulkayga banaan oo tilmaamihiisu sare ku xusan yahay, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskaan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan Qaatay Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

**T-** Aniga oo ah **ABDINASIR AHMED ALI**, Waxaan Cadaynayaa in aan Damiinu Maal ka ahay Dhulka Sare ku Xusan iyo Iska iibiyaha Lagu Magacaabo **C/qaadir Maxamuud Carab Maxamuud**, Isla markaana aan Anigu Bixin doono Qiimigii lagu gaday Dhulkaan hadii wax Ceebaal ah ay ka yimaadaan.

**J-** Aniga oo ah **OMAR ABDULLAHI ARAB** Ahna Iibsadaha dhulkaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan ka Gudoomay Iska iibiyaha Milkiyada Dhulkaan Kuna qancay heshiiskaan.

**X-** Anaga oo Kala ah Calidaahir Axmed Yuusuf & Cali Ibraahin Muuse Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Beecaan.

**SAXIIXA ISKA IIBIYAHA DHULKA**

C/QAADIR MAXAMUUD CARAB MAXAMUUD

**SAXIIXA DAMIINUL MAALKA**

ABDINASIR AHMED ALI

**SAXIIXA IIBSADAHHA DHULKA**

OMAR ABDULLAHI ARAB

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- CALIDAAHIR AXMED YUUSUF

2- CALI IBRAAHIN MUUSE

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 1933/T.P.N/25, Tr. 03/11/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **C/qaadir Maxamuud Carab Maxamuud** Ahna (Iska iibiye), 2- **ABDINASIR AHMED ALI** Ahna (Damiinu-Maal), 3- **Omar Abdullahi Arab** Ahna (Iibsade) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



REF:-1933/T.P.N/2025

Tr:-03-11-2025

MASAWIRKA ISKA IIBIYAHA DHULKA

MASAWIRKA DAMIINUL MAALKA

MASAWIRKA IIBSADAHA DHULKA

C/QAADIR MAX'UUD CARAB MAX'UUD

ABDINASIR AHMED ALI

OMAR ABDULLAHI ARAB



MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA

1-CALI DAAHIR AXMED YUUSUF

2-CALI IBRAAHIN MUUSE





Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

جمهورية الصومال الفدرالية

Federal Republic of Somalia

Kaarka Aqoonsiga

بطاقة الهوية / IDENTITY CARD

Lambarka Aqoonsiga / رقم الهوية / Identity Number

37693036806

Magaca / الاسم / Name

OMAR ABDULLAHI ARAB

Jinsiga / الجنس / Sex

Male

Taariikhda Dhalashada / الميلاد / Date of Birth

05-12-1982

Taariikhda la bixiyay / التاريخ / Date of Issue

28-04-2025

Taariikhda uu dhacayo / الانتهاء / Date of Expiry

28-04-2035



Holder's Signature



Dawladda Federaalka Soomaaliya

Wasaaradda Gaadiidka

Federal Republic of Somalia

Ministry of Transportation

Aqoonsiga Dereewalka

Driving License

L/Aqoonsiga - License No.

42075

Taariikhda la bixiyey - Issued Date

22/02/2025

Magaca - Name

C/qaadir Maxamuud Carab

Taariikhda uu dhacayo - Expiry Date

21/02/2030

Jinsiyadda - Nationality

Somali

Taariikhda Dhalashada - Date of Birth

01/02/1987

Meesha laga bixiyey - Place of Issue

Mogadishu

Heerka Gaadiidka - Vehicle Type

D



**UJEEDDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO 2 BOOS OO BANAAN (AHNA DHUL GOOF AH)**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **03/11/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

<p><b><u>ISKA IIBIYAHA 1'AAD AHNA WAKIIL:-</u></b> MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI, Somali ah, Hooyo: Jamilo Ahmed Ali, Ku Dhashay: Mogadishu, Sanadkii: 2001, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P01518937.</p>	<p><b><u>ISKA IIBIYAHA 2'AAD AHNA WAKIIL:-</u></b> OMAR ABDULLAHI ARAB, Somali ah, Hooyo: Fadumo Jimcaale Maxamed, Ku Dhashay: X/dheere, Sanadkii: 1982, Sita: Kaarka Aqoonsiga Qaranka, Lr. 37693036806</p>
<p><b><u>DAMIINUL MAAL:-</u></b> ABDINASIR AHMED ALI, Hooyo: Arfon Abdi Mohamud, Somali ah, Ku Dhashay: Mogadishu, Sanadkii: 1972, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P01087836</p>	<p><b><u>IIBSADE:-</u></b> C/QAADIR MAXAMUUD CARAB MAXAMUUD, Somali ah, Hooyo: Faadumo Cali Jimcaale, Ku Dhashay: X/dheere, Sanadkii: 1987, Degan Muqdisho, Sita: License, Lr. 42075/Wasaarada Gaadiidka D.F.Somaliya.</p>
<p><b><u>TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO</u></b> Dhul Banaan oo Ku yaal: <b>Muqdisho</b>, Degmada: <b>(Dayniile)</b>, Cabirka: <b>(20X30)-M</b>, Looto No: <b>79-80-</b>, W.M.L: <b>(66676/2006)</b>, Tr. 29/11/2006, Kana Soo Baxay Nootaayo Xamar, Uuna Saxiixay Dr. Muumin Axmed Abuukar</p>	<p><b><u>SOOHDINTA DHULKA</u></b> Bari: <b>Jid</b>, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: <b>Jid</b>, Waqooyi: <b>Jid</b> <b><u>QIIMAHA DHULKA:</u></b> <b>USD \$12,000</b> (Labo Iyo Toban Kun Doolarka Mareykanka ah).</p>

**B-** Anaga oo kala ah **1- MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI 2- OMAR ABDULLAHI ARAB**, Waxaan qoraalkaan si wadajir ah ku cadaynaynaa anaga oo maskaxda Iyo Caqligaba ka fiyoow Cid Na qasabtayna Aysan Jirin in aan ka gadnay kuna wareejinay **C/QAADIR MAXAMUUD CARAB MAXAMUUD**, Dhul banaan oo tilmaamihiisu sare ku xusan yahay, uuna ku qoran yahay **Marxuum C/nuur C/Ilaahi Carab**, Kuna gadnay **(1) Warqad Dhaxalkoob iyo Wakaalad Ref:- MDDAY/DMDHK/21/2025, Tr. 10/07/2025**, kana soo baxday Maxkamada Dagmada Dayniile, ayna Saxiixeen Kaaliye Ibraahin Muuse Maxamed iyo Gudoomiye C/naasir Axmed Maxamed, **(2) Wakaalad Guud Ref:- NBDUKB4/3425/25, Tr. 10/07/2025**, kana soo baxday Nootaayo banaadir-danuun, uuna Saxiixay Dr Yoonis C/raxmaan Max'ud, **(3) Wakaalad Guud Ref:- XPN/B1/1225/25, Tr. 06/07/2025**, kana soo baxday Nootaayo Xanaano, uuna Saxiixay Dr Bashiir Xuseen Maxamed, iyo **(4) Wakaalad Guud Ref:- 1585/TPN/25, Tr. 17/05/2025**, uuna Saxiixay Dr, Maxamed C/Ilaahi Maxamed, Waxaan kale oo aan Cadaynaynaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskaan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah anaga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadaynaynaa in aan u Qaadnay Dhamaan Dhaxaltooyada Lacagta Sare Ku Xusan.

**T-** Aniga oo ah **ABDINASIR AHMED ALI**, Waxaan Cadaynayaa in aan Damiinu Maal ka ahay Dhulka Sare ku Xusan iyo Wakiilada Iska iibiyaha Lagu Magacaabo **1- MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI 2- Omar Abdullahi Arab**, Isla markaana aan Anigu Bixin doono Qiimigii lagu gaday Dhulkaan hadii wax Ceebaal ah ay ka yimaadaan.

**J-** Aniga oo ah **C/QAADIR MAXAMUUD CARAB MAXAMUUD**, Ahna Iibsadaha dhulkaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan ka Gudoomay Iska iibiyaha Milkayada Dhulkaan Kuna qancay heshiiskaan.

**X-** Anaga oo Kala ah Calidaahir Axmed Yuusuf & Cali Ibraahin Muuse Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Beecan.



Bee  
R. 1933/T.P.N/25  
Tr. 03/11/25  
20X30.M  
L. 79-80-H

REF:-1932/T.P.N/2025

Tr:-03-11-2025

MASAWIRKA ISKA IIBIYAHA 1-AAD AHNA WAKIL MASAWIRKA ISKA IIBIYAHA 2-AAD AHNA WAKIL

MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI

OMAR ABDULLAHI ARAB



MASAWIRKA DAMIINUL MAALKA

MASAWIRKA IIBSADAHA DHULKA

ABDINASIR AHMED ALI

C/QAADIR MAXAMUUD CARAB MAXAMUUD



MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA

1-CALI DAAHIR AXMED YUUSUF



2-CALI IBRAAHIN MUUSE





**SAXIIXA ISKA IIBIYAHA 1-AAD AHNA WAKIIL**

MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI

**SAXIIXA ISKA IIBIYAHA 2'AAD AHNA WAKIIL**

OMAR ABDULLAHI ARAB


**SAXIIXA DAMIINUL MAALKA**

ABDINASIR AHMED ALI


**SAXIIXA IIBSADAHA DHULKA**

C/QAADIR MAXAMUUD CARAB MAXAMUUD


**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- CALIDAAHIR AXMED YUUSUF



2- CALI IBRAAHIN MUUSE




**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 1932/T.P.N/25, Tr. 03/11/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI, 2- Omar Abdullahi Arab Ahna (Iska iibiyayaal ahna Wakiil), 3- ABDINASIR AHMED ALI Ahna (Damiinu-Maal), 4- C/Qaadir Maxamuud Carab Maxamuud Ahna (Iibsade) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"







Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

جمهورية الصومال الفدرالية

Federal Republic of Somalia

Kaarka Aqoonsiga

بطاقة الهوية / IDENTITY CARD

Lambarka Aqoonsiga / رقم الهوية / Identity Number

37693036806

Magaca / الاسم / Name

OMAR ABDULLAHI ARAB

Jinsiga / الجنس / Sex

Male

Taariikhda Dhalashada / الميلاد /

/ Date of Birth

05-12-1982

Taariikhda la bixiyay / الإصدار /

/ Date of Issue

28-04-2025

Taariikhda uu dhacayo / الانتهاء /

/ Date of Expiry

28-04-2035



Holder's Signature









Sumad:MDDAY/DMDHK/21/2025

Tr:10/07/2025

Ujeeddo: Sugitaan dhaxalkoob iyo wakaalad

Maanta oo ay taariikhdu tahay 10/07/2025 waxaa maxkamadda hor-yimid dhaxaltooyada Marxuum C/nuur Cabdullahi Carab ina Faadumo Jimcaale Maxamed:

waxa ay Maxkamadda ka codsadeen in loo qora warqad sugitaan dhaxalkoob, intaa kadib waxa ay u dirtay Marqaatiyaal, waxa ayna horkeeneen Marqaatiyaasha kala ah;

1. Ali-dahir Ahmed Yusuf ina Fadumo Farah Mohamed dhashay 01/01/1988, deggan xamar lehna aqoonsi lambar P01620420 dagan dayniile.
2. Abdinasir Ahmed Ali ina Arfon Abdi Mohamud dhashay 20/10/1972, lehna aqoonsi lambar P01087836 dagan dayniile.

Dhaar kadib, Waxa ay labada Marqaati Maxkamadda ka hor caddeeyeen ayaga oo jir iyo Maskaxahaanba caafimaad qaba, cid qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, in uu geeriyoday C/nuur Cabdullahi Carab uu geeriyooday kuna geeriyooday xamar taariikhdu markii ay ahayd 20/05/2008, kuna geeriyooday xamar dhaxalkiisana ay leeyihiin aabihiis hooyadiis xaaskiisa 1-wiil 2-gabdhoo oo kala ah,

1. C/Ilaahi Carab Maxamuud ina Muumino Jiisow Cusmaan dhashay 01/01/1939 ahna aabaha marxuumka.
2. Maxamed Cabdinuur Cabdullahi ina Jamilo Axmed Cali dhashay 01/01/2001 ahna wiilka marxuumka
3. Muniiro Cabdinur Cabdullahi ina Jamilo Axmed Cali dhalatay 08/03/2004 ahna gabadha marxuumka.
4. Muna Cabdinur Cabdullahi ina Jamilo Axmed Cali dhalatay 28/12/2002 ahna gabadha marxuumka.
5. Marxuumad Jamiilo Axmed Cali ina Carfoon Cabdi Maxamuud xaaska Marxuumka waxaa dhaxalkeeda iska leh caruurteeda oo kala ah
  - Maxamed Cabdinuur Cabdullahi ina Jamilo Axmed Cali dhashay 01/01/2001 ahna wiilka Marxuumada
  - Muniiro Cabdinur Cabdullahi ina Jamilo Axmed Cali dhalatay 08/03/2004 ahna gabadha marxuumada.
  - Muna Cabdinur Cabdullahi ina Jamilo Axmed Cali dhalatay 28/12/2002 ahna gabadha marxuumkada.
6. Marxuumad Faadumo Jimcaale Maxamed ahna hooyada marxuumka waxaa dhaxalkeeda iska leh.
  - Cali Cabdullahi Carab ina Faadumo Jimcaale Maxamed dhashay 01/01/1967 ahna wiilka marxuumada
  - Cumar Cabdullahi Carab ina Faadumo Jimcaale Maxamed 05/12/1982 ahna wiilka marxuumada
  - Xasan Cabdullahi Carab ina Faadumo Jimcaale Maxamed 03/03/1985 ahna wiilka marxuumada
  - Xabiibo Cabdullahi Carab ina Faadumo Jimcaale Maxamed 01/06/1970 ahna gabadha marxuumada
  - Xaliimo Cabdullahi Carab ina Faadumo Jimcaale Maxamed 01/05/1972 ahna gabadha marxuumada
  - Naciimo Cabdullahi Carab ina ina Faadumo Jimcaale Maxamed 03/03/1985 ahna gabadha marxuumada
  - Canab Cabdullahi Carab ina Faadumo Jimcaale Maxamed 01/01/1986 ahna gabadha marxuumada



Waxayna ka dib mid mid ugu horcadeeyeen Markhaatiyaashaan ayagoo xiskoodu taam yahay isla markaana aysan jirin cid qasabtay qowl iyo ficilba in **Marxuum C/nuur Cabdullahi Carab**, uu dhaxaltooyadiisa uga 2-boos lehna tilmaamahan;-

1. 2-Boos Banaan oo ku yaala degmada dayniile cabirkoodu yahay **20x30Mtr L/N:(79-80-H)** Lehna warqada Milkiyad No:**66676/06** kuna Tr:**29/11/06**, kana so baxday xafiiska Nootaayaha Xamar uuna saxiixay Dr.Mumin Axmed Abuubakar.

### QEYBTA WAKAALADA

1. Munira Abdinur Abdullahi 2.Mana Abdinur Abdullahi waxaa wakiil u ah Mohamed Abdinur Abdullahi sida ku cad warqad Rep.**1585/T.PN/25** kuna tr:**17/05/2025**.kana soo baxday xafiiska Nootaayaha & Latalinta Arimaha Sharciga Ee Tayo uuna ku saxiixanyahay Dr.Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo."
2. 1)Ali Abdullahi Arab 2)Habibo Abdullahi Arab 3)Halimo Abdullahi Arab 4) Naimo Abdullahi Arab 5) Hassan Abdullahi Arab 6)Anab Abdullahi Arab waxaa wakiil u ah Omar Abdulle Arab sida ku cad warqad Ref no:**XPN/B1/1225/2025** kuna tr:06/07/2025 kana soo baxday xafiiska nootaayada latalinta arimaha sharciga ee xanaano uuna ku saxiixanyahay Dr.Bashiir Xuseen Maxamed.
3. Cabdullahi Carab Maxamuud Xasan waxaa wakiil u ah Cumar Cabdullahi Carab Maxamuud sida ku cad warqad Ref no:**NBDUKB4/3425/2025** kuna tr:10/07/2025 kana soo baxday xafiiska nootaayada latalinta arimaha sharciga ee Banaadir uuna ku saxiixanyahay Dr.Yonis Abdirahman Mohamud (Timacade).

Sidoo kale dhaxaltooyadda Waxay Maxkamadda ka horcadeeyeen in ay u wakiisheen **Maxamed Cabdinuur Cabdullahi Ina Jamiilo Axmed Cali 24-jir ah lena aqoonsi lamabar/P01518937 iyo Cumar Cabdullahi Carab ina Faadumo Jimcaale Maxamed 43-jir lehna aqoonsi lamabar P01260021** una wakiisheen hantida dhaxalka ah ee kor ku tilmaaman ee dhaxalka ah waxayna awood buuxda u siiyeen in ay, u qaadi karaan ,u hibayn karaan, macaamilka ka gali karaan, u dacwoon karaan, Qareen u qaban karaan, ku Wareejin-karaan, qof walba qismigisa siin karaan, iyaguna waa ay aqbaleen wakiilnimadiisa.

### SAXIIXA WAKIILADA DHAXALTOOYADA

1. Cumar Cabdullahi Carab \_\_\_\_\_
2. Maxamed Cabdinur Cabdullahi \_\_\_\_\_

### SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1. Ali-Dahir Ahmed Yusuf \_\_\_\_\_
2. Abdinasir Ahmed Ali \_\_\_\_\_

### MAXKAMADA DEGMADA DAYNIILE


Markii ay aragtay Maxkamadda codsiga dhaxaltooyada iyo caddeymaha marqaatida ujeedada sare ku xusan Maxkamadda waxay sugeysaa caddeyntaan **SUGITAAN DHAXALKOOB IYO WAKAALAD**. waana mid ansax ah oo waafaqsan shareecda islaamka iyo qaanuunka dalka,Maxkamadduna waxey ku qortay buuga diiwaanka guud ee Mucaamalaadka kana Saxiixday dadka ay qusayso.

**KAALIYAHA MAXK/DEG/DAYNIILE**

Ibrahim Muse Mohamed

**GUDOOMIYAHA MAXK/DEG/DAYNIILE**

Abdulnasir Ahmed Mohamed







Ujeeddo: **Wakaalad Guud (qeyb-dhaxaleed)**

Taariikh: 10/07/2025

Muqdisho Maanta oo ay taariikhdu tahay 10/07/2025 Anigoo ah **Cabdullaahi Carab Maxamuud Xasan** soomaali ah, ina Muumino Jiisoow Cusmaan ku dhashay Xarardheere sanadkii 1937-dii, degan Xamar, Lehna (Baasaboorka Lr. P00738089 ee warqadaan ku dhegan) iyo Tell: 0615-972760, isla markaasana ka caafimaad qaba wax allaale iyo wixii wax u dhimi karaya maskaxda iyo jirka bini'aadamka cid i qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxaan halkaan si buuxda ugu caddeynayaa in aan wakaalad Guud oo qeyb dhaxaleed ah siiyay **Cumar Cabdullaahi Carab Maxamuud** soomaali ah, ina Faadumo Jimcaale Maxamed ku dhashay Xarardheere sannadkii 1982-dii, degan Xamar, lehna (Baasaboorka Lr. P01260021 ee warqadaan ku dhegan) iyo Tell: 0615-991366, waxaana u wakiilanay dhamaan qeybta ama qismiga aan ku leenahay dhaxalka laga dhaxlayo Xaaskeygii **Marxuumad Faadumo Jimcaale Maxamed** iyo dhaxalka laga dhaxlayo Wiilkeygii **Marxuum C/nuur C/llaahi Carab Maxamuud**, waxaana u siiyay awood buuxda oo dhinac waliba ah, dhaxalkoobka ayuu u sameyn karaa, waa ii saxiixi karaa saxiix waliba oo la iiga baahdo, qeybteyda ayuu ii qaadi karaa, waa u dacwoon karaa, qareen ayuu u qaban karaa, heshiis ayuu ka gali karaa, waa kireyn karaa, waa gadi Karaa, waa hibeyn karaa, dhaxal-qaybin ayuu u sameyn karaa, cid kale ayuu usii wakiilan karaa, waxa uuna ka taagan yahay awooda sare ku qoran meeshii aan ka taagnayn, waxaan wakaaladaan guud bixinay anaga oo ka caafimaad qabna Maskaxda iyo jirkaba cid na qasabteyna aysan jirin qawl iyo ficilba.

Aniga oo ah Cumar Cabdullaahi Carab Maxamuud, degan Xamar, waxaan caddeynayaa in aan aqbalay wakaaladda uu ii wakiishay Cabdullaahi Carab Maxamuud Xasan. =====

**Saxiixa Wakaalad Bixiyaha**

1. Cabdullaahi Carab Maxamuud Xasan 1

**Saxiixa Wakaalad Aqbalah**

1. Cumar Cabdullaahi Carab Maxamuud 1

**Saxiixa Markhaatiyaasha**

1. C/naasir Axmed Cali Tell :0619-606701 1
2. Cali-daahir Axmed Yuusuf Tell: 0615-111103 2

**Xafiiska Nootaayo Banaadir-Danuun**


**TIX: NBDUKB4/3425/2025**

**Saxiixa la Sugay**

Aniga oo ah Dr. Yonis Abdirahman Mohamud (Timacadde) leh xafiiska nootaayo Banaadir-Danuun waxaan halkaan ku sugayaa in saxiixyada sare ku qoran ay yihiin kuwii dhabta ahaa ee Awood bixiyaha, aqbalaha & markhaatiyaasha sare ku xusan, waxayna ku saxiixeen Xafiiska dhexdiisa iyadoo aan cidina aysan qasbin, wayna ku qanceen ka dib markii ay iska aqriyeen waxaana ku qoray diiwaanka guud ee nootaayada.

**Xafiiska Nootaayo Banaadir-Danuun**

Dr. Yonis Abdirahman Mohamud (Timacadde).







**UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"**

Maanta oo ay taariikhdu tahay **17/05/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

**WAKAALAD BIXISADA 1AAD:-** MUNIRA ABDINUR ABDULLAHI, Hooyo: Jamilo Ahmed Ali, Somali ah, Ku Dhalatay: Mogadishu, Sanadkii: 2004, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P01578608

**LA WAKIISHE:-** MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI, Hooyo: Jamilo Ahmed Ali, Somali ah, Ku Dhashay: Mogadishu, Sanadkii: 2001, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P01518937

**WAKAALAD BIXISADA 2AAD:-** MUNA ABDINUR ABDULLAHI, Hooyo: Jamila Ahmed Ali, Somali ah, Ku Dhalatay: Mogadishu, Sanadkii: 2002, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P01658211


**B-** Anaga oo kala ah **1- MUNIRA ABDINUR ABDULLAHI 2- MUNA ABDINUR ABDULLAHI**, Waxaan qoraalkaan si wadajir ah ku Cadaynaynaa Anaga oo Maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka Fayow Cid Na Khasbaysana Aysan jirin in aan Wakiilanay Walaalkayn **MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI** Una Wakiilanay Wakaalad Guud, oo Ku Saabsan Dhamaan Qayb Dhaxlaydka aan Ku Leenahay Hooyadeyn **Marxuumad Jamiil Axmed Cali**, & Aabahayn **Marxuum C/nuur C/llaahi Carab**, in Qaybteena uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, Dhaxalkoob iyo Dhaxal Qaybin u Sameyn Karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Hantidaas oo Iskugu Jirta guurto & iyo ma guurto, Sida Dhulal Banaan, Guryo Dhisn, Dhul Beereed, Waxaan mar kale sii caddeynaynaa in **MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI** awoodaas aan siinay uu u madax banaan yahay oo anaga Qeyb dhaxaleedkaas aan soo sheegnay ka macaamilideeda wax nalooga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiiyeen **1- MUNIRA ABDINUR ABDULLAHI 2- MUNA ABDINUR ABDULLAHI**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**J-** Anaga oo Kala ah **C/naasir Axmed Cali & C/llaahi Carab** Maxamuud Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Wakaalada Sare Ku Xusan.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA 1-AA**  
MUNIRA ABDINUR ABDULLAHI

**SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA 2-AAD**  
MUNA ABDINUR ABDULLAHI

**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**  
MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI

1- C/NAASIR AXMED CALI

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

2- C/LAAHI CARAB MAXAMUUD

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 1585/T.P.N/25, Tr. 17/05/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- MUNIRA ABDINUR ABDULLAHI, 2- MUNA ABDINUR ABDULLAHI** Ahna (Wakaalad Bixiyayaal), **3- MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By:



NOOTAAYAHA



Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



1-MUNIRA ABDINUR ABDULLAHI

2-MUNA ABDINUR ABDULLAHI

MOHAMED ABDINUR ABDULLAHI



MASAWIRADDA MARKHAATIYAASHA

1-C/NAASIR AXMED CALAN

2-C/LLAHI CARAB MAXAMUUD









# XAFIISKA NOOTAAYADA IYO LATALINTA ARIMAHA SHARCIGA EE XANAANO

GALMUDUG-SOMALIA

HANANO LAW OFFICE AND PUBLIC  
NOTARY SERVICE

## مكتب حنانو للاستشارات القانونية وتوثيق العقود



### UJEEEDO: - WAKAALAD GUUD

**Dhuusamareeb**, Maanta oo ay taariikhdu tahay **06-07-2025** annagoo kala ah:- (1) **Ali Abdullahi Arab**, soomaali ah, ina **Fadumo Jimale Mohamed**, degan degmada dhuusamareeb, ku dhashay Harardhere, sannadkii **1967-dii**, tell: **0615961404**, lehna (ID no: **DGGMD 001017** kuna dheggaan warqaddan dhabarkeeda) (2) **Habibo Abdullahi Arab**, soomaali ah, ina **Fadumo Jimale Mohamed**, degan degmada dhuusamareeb, ku dhalatay Harardhere, sannadkii **1970-kii**, tell: **0616376449**, lehna (ID no: **DGGMD 00990** kuna dheggaan warqaddan dhabarkeeda) (3) **Halimo Abdullahi Arab**, soomaali ah, ina **Fadumo Jimale Mohamed**, degan degmada dhuusamareeb, ku dhalatay Harardhere, sannadkii **1972-dii**, tell: **0615972896**, lehna (ID no: **DGGMD 00988** kuna dheggaan warqaddan dhabarkeeda) (4) **Naimo Abdullahi Arab**, soomaali ah, ina **Fadumo Jimale Mohamed**, degan degmada dhuusamareeb, ku dhalatay Harardhere, sannadkii **1985-tii**, tell: **0614991366**, lehna (ID no: **DGGMD 00970** kuna dheggaan warqaddan dhabarkeeda), (5) **Hassan Abdullahi Arab**, soomaali ah, ina **Fadumo Jimale Mohamed**, degan degmada dhuusamareeb, ku dhashay Harardhere, sannadkii **1985-dii**, tell: **0615513328**, lehna (ID no: **DGGMD 00133** kuna dheggaan warqaddan dhabarkeeda) iyo (6) **Anab Abdullahi Arab**, soomaali ah, ina **Fadumo Jimale Mohamed**, degan degmada dhuusamareeb, ku dhalatay Harardhere, sannadkii **1986-dii**, tell: **0615513328**, lehna (ID no: **DGGMD 00133** kuna dheggaan warqaddan dhabarkeeda) ahna **wakaalad bixiyeyaal**, isla markaana ka wada caafimaad qaba wax allaale wixii wax u dhimi kara maskaxda iyo jirka bini'aadamka cid na qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxaan si buuxda u caddeynaynaa inaan u wakiilanay (**OMAR ABDULLAHI ARAB**, soomaali ah, ina **Fadumo Jimale Mohamed**, deggan degmada dhuusamareeb, ku dhashay Harardhere, sannadkii **1982-dii**, lagana helo tell: **0615991366**, lehna (Soomaali Baasaboora lam: **P01260021** kuna dhaggaan warqaddan dhabarkeeda) una wakiilanay in uu noo gadi karo, dhisi karo, kireyn karo, heyn karo, xafidi karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo haddii loo baahdo, rahan gelin karo kana saari karo, dhaxalkoob noogu sameyn karo naguna matali karo dhankasta oo na looga baahdo suul iyo saxiixba dhammaan wixii hanti dhaxal ah oo aan ka dhaxleyno hooyadeen **Marxuumad Faadumo Jimcaale Maxamed**, oo iskugu jirta hanti Ma **Guurto** iyo **Guurto**, sidaas darteed waxaan mar labaad caddeynaynaa in wakiilkeenu u madax banaan yahay wax kasta oo ku saabsan dhammaan wixii hanti dhaxal ah oo aan ku leenahay hooyadeen **Marxuumad Faadumo Jimcaale Maxamed**, waxaana wakaaladaan saxiixnay annagoo miirkeenu iyo xiskeenuba taam yihiin, xor nahay, cidna na qasbin, waxaana wakaaladaan ku qornay rabitaankeena gaarka ah=====

**Aqbal:** anigoo ah **Omar Abdullahi Arab** waxaan caddeynayaa inaan aqbalay wakaaladaan ay i siiyeen walaalaheey kor ku xusan, waxaana ugu adeegi doonaan sida uu sharcigu qabo, iyadoo ay Marqaatiyaal goobjoogayaal ah ka yihiin dadka hoos ku saxiixan=====

**NB:** wakaaladaan waxay shaqeyn kartaa ilaa **14-07-2027**

MAGACA & SAXIIXA WAKAALAD BIXIYEYAASHA

1. Ali Abdullahi Arab      2. Habibo Abdullahi Arab      3. Halimo Abdullahi Arab  
\_\_\_\_\_  
4. Naimo Abdullahi Arab      5. Hassan Abdullahi Arab      6. Anab Abdullahi Arab  
\_\_\_\_\_

MAGACA & SAXIIXA LA WAKIISHAHA

Omar Abdullahi Arab  
\_\_\_\_\_

MAGACA & SAXIIXA MARQAATIYAASHA

1. Abdirizak Sheikh Ahmed Nur      2. Ali Abdulkadir Nurre (Cali-baashi)  
Tell: 0615868628      Tell: 0617569721  
\_\_\_\_\_

SUGITAANKA NOOTAAYADA

Ref no: XPN/B1/1225/2025

Taariikh: 06/07/2025

Anigoo ah **Dr. Bashir Xuseen Maxamed**, lehna xafiiska nootaayaha **Hanano Public Notary** Xaruntiisa degmada dhuusamareeb, caasimada galmudug waxaan halkaan ku caddeynayaa in wakaaladaani tahay mid sax ah waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaasna ay saxiixeen dhinacyada wakaaladaani khuseyso, waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee nootaayada.

(Xafiiska Nootaayo Xanaano Public Notary)  
(Dr' Bashir Xuseen Maxamed)






FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTIONAL AFFAIRS

NOTARY DOCUMENT VERIFIED CERTIFICATE

Shahaado Caddeyn dukumeenti Nootaayo

Diiwaanka Wasaaradda: XPN/B1/1225/2025

DATE: 06-07-2025

Nooca	Wakaalad
Magaca Nootaayada	Hanaano
Nooca Shaqada	Wakaalad Guud
Degmada	Dhuusamareeb
Magaca Dr-ka Nootaayada	Bashiir Xuseen Maxamed
Notaayo Ref. No:	XPN/B1/1225/2025
Taariikhda	06-07-2025
Shahaadadaan wexey cadeyneysa saxahaansha nootaayada saxiixeda iyo tiimbaraheeda iyo habraaca dokumintiga in uu sax yahay	This certificate certifies the authenticity of the notary's signature and stamp and the process of the document.



Agaasimaha Waaxda Garsoorka  
Wasaaradda Cadaaladda &



AYIJAANOO JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA



Heshiiskan kala gadasho laba boos banaan  
 gadasho, taariikhda Maanta oo ay tahay 29/ka bisha Noofemba  
 29/11/06, Faadumo Fiidow Dhiblaawe, Soomaaliga degan Xamar  
 Waxay qoraalkani ku Caddeynaysaa in ay ka gaday kuna wareejisay Cabdi-  
 Nuur Cabdullahi Carab 2/Boos boos banaani oo ku yaala Xamar degmada  
 Dayniile Cabirkooduna yahay 20X30M-Lotto no. 79+80-H-Waqooyi dhul dad  
 inta kale-Jidad, labadaas boos oo ay ka dhaxashay Wiidkeeda Marxuum  
 Cali Cabdi Maxamuud sida ku Cad Warqadda dhaxal Koobka lamb. yahay =  
 iyo dhaxal qaybis lamb. yahay M/K/SH/00225/06 ee la qoray 15/11/06-kana  
 soo baxday Maxkamadda ku dhacanta Shareecadda Islaamka Soomaliyeed  
 Qaybta Gubta uuna saxiixay Guddoomiyaha Maxkamadda Sheekh Cabdullahi  
 Maxamed Axmed (Jalay). = = = = =

Sidaas darteed Faadumo Fiidow dhiblaawe waxay qoraalkan ku Caddeynaysaa  
 in ay ka gaday kuna wareejisay Cabdinuur Cabdullahi Carab labadiisa  
 boos banaan oo ku yaala degmada Dayniile, taariikhda Maanta ah wixii ka  
 dambeeya Milkiyadda labadaas bood banaan CABDI NUUR CABDULLAHI CARAB  
 Waxayna ku heshiiyeen oo ku kala gateen Qiimo USD.300 USA-Dolar = = =  
 (Saddex boqol dolar) oo kala bax ah gacanta laga wada saaray iska gadaha  
 labada boos banaan. = = = = =

Dhulkaas oo laga dhaxlay Cabdi Maxamuud Sheekh sida ku Cad Warqadda  
 dhaxalkoobka lamb. yahay AM/0324/06 ee la qoray 28/10/06, kana soo baxday  
 Maxkamadda Shareecadda Islaamka Soomaaliyeed Xararyaale W/Dhiigley  
 uuna saxiixay Guddoomiyaha Maxkamadda Sh. Axmed Mac. Xasan (Indha giir)  
 Wax alaale wixii dhib ah ama durid sharci ah ka yimaada Milkiyadda  
 labaas boos banaan waxaa mas'uul ka ah Faadumo Fiidow Dhiblaawe,  
 ahna iska Iibiyaha labada boos banaan. = = = = =

Wixii halkan ku qornayn waxaa loo raacya sida uu qabo sharciga J.  
 Soomaaliya una degsan arrimahaan. = = = = =  
 Heshiiskan sida ayaa lagu wada dhmaystay ka dib marki ay aqriisteen  
 oo ay wada fahmeen ayaa halkan hoose ila wada saxiixeen. = = = = =

- 1)-Faadumo Fiidow Dhiblaawe \_\_\_\_\_ Iska gadaa
  - 2)-Cabdinuur Cabdullahi Carab \_\_\_\_\_ *Casir Nuur Cabdullahi Carab* Gate
- Heshiiskan kala gadashda labada boos banaan waxaa marqaati ka ahaa:-
- 1)-Cabdinaasir Axmed Cali \_\_\_\_\_
  - 2)-Maxamuud Cabdi Maxamuud \_\_\_\_\_



sum : MK/18/00225/2008

**Maamulka Islaamiga  
ee Dayniile  
Maxkamadda ku dhaqanka  
Shareecada islaamka  
(Qaybta Gubta)**



الإدارة الإسلامية  
في دينيلى  
المحكمة الشرعية  
(فرع غبتا)

Ujeedo : dhaxal koob iyo dhaxal qeybis marxuum cabdi maxamuud shiikh.

Maanta oo ay taariiqdu tahay 15/11/06 waxaa maxkamadda islaamiga ah ee gubta dhaxal koob iyo dhaxal qeybis ku sameeyay dhaxal tooyada marxuum cabdi maxamuud sheekh waxaana loo dhaxlayay dhul goof ah oo cadakiisu gaarayo 134 boos dhulkaas oo ay aabahood ka dhaxlayaan.

Waxay ku dhaxleen cadad ama afaraad gaaraysa in ruux : oo ay ku jirto hooyo:

1. faadumo fiidoow dhiblaawe xaaska marxuumka waxay heshay 16.5 boos. waxay leedahay balooga koowaad ka bilaawdo( OIH \_ ILAA 16H)

2. maxamed cabdi maxamud wiilka marxuumka wuxuu helay 29 boos.

(laga bilaabo (17h\_ ila 45h)

3 .maxamuud cabdi maxamuud 'wiilka marxuumka wuxuu helay 29 bos .....

(laga bilaabo( 45h \_ 64h) hadana laga bilaabo (98h ilaa 107 h).



4.cali cabdi maxamuud wiilka marxuumka wuxuu helay  
29 boos.

(laga bilabo 65h \_80h) hadana laga bilaabo (108\_120h)

5. carafoow cabdi maxamuud gabadha marxuumka  
waxey heshay 14.5.

lagabilabo (81'83;85;87;89;91'93'95;121'123;125;127;130;  
132 iyo nus boos 97 ayada luul ayuu ka dhexceeyaa .)

6. luul cabdi maxamud gabadha marxuumka waxey  
heshay . 14.5 boos.

° (82'84;86'88;90;92;94;96'122;124;126'128'129;131H)

wadarta dhulka la qeeybiyay waa  
 $=132.5+1.5=134$  boos.

intaas ka dib maxkamaddu waxay dhaxashay nasiibki cali cabdi  
maxamud waxay u dhaxashay dad gaaraya .

1.faadumo macalin cabdule xaaska marxuumka waxa ay  
heshay 3 boos .  
(116h, 118h ;112h)

2.muuse cali cabdi wiilka marxuumka waxa uu  
helay 4boos .

(. 69 h.70 h 71h , 72h)

3. cumar cali cabdi wiilka marxuumka waxa uu helay 4boos.  
(; 73h' 74h 75h 76h )

4.abshir cali cabdi wiilka marxuumak waxa uu helay  
4 boos  
laga bilaabo (108h '109 h '110h' 117h).



Blue

L<sub>2</sub> 887/2003

T<sub>2</sub> 8/4/2009

20X45

L<sub>2</sub> 087 084 086

5. maxamed cali cabdi wiilka marxuumka waxa uu helay 4boos

(111h;113h ;114h ;115h).

6. hani cali cabdi gabadha marxuumka waxa ay heshay 2 boos.

( 133h ;134h).

7. ayaan cali cabdi gabadha marxuumka waxa ay heshay 2 boos.

waxa ay leedahay (77h ' 78 h)

8. faadumo fiidoow dhiblaawe hooyada marxuumka waxa ay heshay 4 boos.

( 79h,80h'119h ;120h)

wadarta dhulka la dhaxlay waa  $27+2=29$

dhulka aan la qeybin ee haraagaa waa (65h'66h'67h'68h) maadaama ay qeybsami weecysay waxaa loo qaatay qarashka qoraalka iyo dhaxalsiinta oo uu bixiyay c/naasir axmed cali dhulkaasna waxaa leh c/naasir xamed cali oo milkiyad u leh.

Garsoore: sheekh shariif muxiyidiin.



Kaaliye: c/risaaq maxamed maxamuud.

Gudoomiyaha maxkamadda sharecada gubta.

Sheekh: c/laahi maxamed axmed jaleey.



Breed

L<sub>12</sub> 1137/2007

D<sub>3</sub> 22/10/2007

40 X 15

L = 133 - 134 - H

Saxiixa dhaxaltooyada marxuum cabdi maxmuud sheekh

1. hooyo faadumo fiidoow dhiblaawe.-----
2. maxamed cabdi maxamuud.-----
3. maxamuud cabdi maxamuud.-----
4. carafoow cabdi maxamuud.-----
5. luul cabdi maxamuud.-----
6. cali cabdi maxmuud.-----

saxiixa dhaxaltooyada marxuum cali cabdi maxamuud

- ayan cali cabdi.-----
- maxamed cali cabdi.-----
- abshir cali cabdi.-----
- muuse cali cabdi.-----
- cumar cali cabdi.-----
- hani cali cabdi.-----
- faadumo maclin cabdule xaaska marxuumk.-----



MAXKAMADDA DEGMADA DAYNIILE



محكمة ناحية دينلي

TEL: 245419 - 274639 - 275204 - 406955

Lr.MDDIG/\_\_\_\_\_/005.Summad

-0-0-0-0-

Taariikh 06/11/2005.ta

UJEEDDO:-Xukun Maxkamadeed:-

Waxaa Maxkamadda Dacwo keensaday Taariikhdu Markay Ahayd 24/09/05.ta Dadka kala ah  
1) Aamino Axmed Jimcaalle (Hooyadeedna tahay Mako Sh.C/le Afrax Iyo Nuur Maxamed Farax  
Hooyadiisna tahay Khadiijo Sh.C/le Afrax Dacwadaas oo lidku ah Iilmahay Dhaleen-Maxamud  
Sh.C/le Afrax Iyo Cismaan Sh.C/le Afrax. Waxayna kudadwaynayaan Iney Xoogkaga haystaan  
Dhul uu kadhintay Awoogood Sh.Cabdile Afrax oo Laba Goof ah Dharalna u ah dadki uu  
Dhalay Sh.Cabdile Afrax taasoo ay diidanyihiin dadka Dacwaysanayaasha, ah Goofahaa oo  
Kuyaala Degmada Daynille Qaybta Baytul amaanna.

Kadib Maxkamaddu waxay uyeertay Dadka ladaawaynayo oo Reer Maxamud Sh.Cabdile Afrax  
Iyo Reer Cismaan Sheekh C/le Afrax. Si ay uga Soojawaabaan dacwada lagu soo oogay Waxay-  
Na kujaawabeen iyagoo Mid Mid ujawaabaya Ineysan Haysan Dhul Dharal ah oo uu kadhintay  
Sh.C/le Afrax Dhulka ~~ah~~ Aan haysano Anaga ayaa Iska leh Waxaana kadhaxalnay Aabayaasha-  
Yo Maxamud Sh.C/le Afrax Iyo Cismaan Sh.C/le Afrax.

Intaas kadib Maxkamaddu Waxay Dacwoodayaasha udiray Markhaantiyaal Caadiliin ah oo u  
Cadeeya waxa ay sheeganayaan Waxayna Maxkamadda Horkeeneen Sadex Markhaanti oo kala ah  
1) Cumar Maxamud Maxamed 72.Sano Jir ah (2) Cumar Sh.Axmed Jawle 82.Sano Jir ah ( )-  
Kuseen Xassan Jimcaale. Markhaantiyaashaas Saxeexda ah Wax Mulkiyad ah uma Sugin Iacwo  
Dayaasha Midkoodna. kamana Sugnaan Markhaantigoodu Maxkamadda.

Intaas kadib Maxkamaddu Waxay Amartay Iney dhaartaan Dacwaysanayaashu kuma Dhaartaan  
Dhulka lagu Haysto Wayna Dhaarteen Dacwaysanayaasha oo kakooban Reer-Maxamud Sh.C/le  
Iyo Reer-Cismaan Sh.C/le Afrax oo tiradoodu Gaarayso 13'Qofood Magacyadooduna kala

Tihiin Sidan (1)-Maxamud Cabdi Maxamud Sh.C/le (2)-Luul Cabdi Maxamud Sh.C/le

(3)-Faadumo Fiidoow Dhiblaawe (4)-Carafow Cabdi Maxamud Sh.C/le

(5)-Muuse Cali Cabdi Maxamud (6)-Cumar Cali Cabdi Maxamud

(7)-Maxamed Cali Cabdi Maxamud (8)-Hani Cali Cabdi Maxamud

(9)-Shariifo Cismaan Maxamud Sh.C/le (10) Carfoon Cismaan Maxamud Sh.C/le

(11) Aamino Maxamud Sh.C/le Afrax (12)-Axmed Cismaan Maxamud Sh.C/le

(13) Luuleey Cismaan Sh.C/le Afrax ( ) ( ) ( ) ( )

BOGGA 2'AAD

Dhammaan Dadkaasi Waxay kudhaarteen Magaca Alle Iney Dhulkaas lagu Soodo-  
Weeyey ay Iyagu Iska leeyihiin Sh.Cabdile Afraxna uusan Shaqo kulahayn dhulkaas.

ASBAABTA XUKUNKA MAXKAMADDA

Markay Aragtay Dacwada Dacwoodayaasha kala, ah:-Aamino Ahmed Jimcaalle Iyo Nuur  
Mammed Faarax Iyo Jawaabta Dacweysanayaasha ay bixiyeen

Markay Aragtay Markhaantiyaasha ay Maxkamadda Horkeeneen Dacwoodayaashu oo aan  
Sugin Wax mulkiyad ah Haba yaraatee.

Markay Aragtay Dhaarta ay dhaateen Dacwaysanayaashu kuna dhaarteen Magaca Alle  
Iney Dhulkaas iyagu leeyihiin Sh.C/le Afraxna Shaqo kulahayn




Markay Aragtay Dhulka Laysku haysto kuna Soowareegtay Maxkamaddu Dhulkaasi

XUKUNKA MAXKAMADDA

Maxkamadda Degmada Dayniille Laanta Gubta Maanta ay taariikhdu tahay 06/11/05. ta  
Waxay Xukuntay In dhulka ay Soo dacweeyeen Aamino Ahmed Jimcaalle iyo Nuur Mammed  
Faarax oo Labada Goof ah kunayaala Degmada Dayniille Kaafadda Baytul-amaana Iuga  
Xukumay Dacwoodayaasha Loona Xukumay Dadkii ay kusoo dacweeyeen oo ah Reer-Muhammad  
Sh.Cabdile Iyo Reer-Cismaan Sh.Cabdille dadkaas oo dhammaantood Maxkamaddu dhawrisay  
Xukunkaas Maxkamaddu Waxay uuskatay Xadiis Nabiga ee Albayinatu Calal Mudaci Wal-  
Yamiiru Calaa Man ankara)

Wabilaahi towfiq

GARSOORAYAASHA MAXKAMADDA

- 1-Sh.Salaad Ahmed Siyaad Guddoomiye 
- 2-Sh.C/llaahi Cali Iimaan Garsoore 
- 3-Ahmed Sheekh Faarax Kaaliye 

TAARIIKH 06/11/05. ta



بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

# محكمة تطبيق الشريعة الإسلامية في الصومال

## Maxkamadda Hergelinta Shareecada Islaamka Soomaaliyeed Somali Implementation Islamic Shariah Court

Tel. 654040 / 934999 Mogadishu - Somalia

W/Dhiigley - Xararyaale

Ref. Summad:

AM/0324/06

Date: 28/10/2006

Ujeeddo: SUGITAAN DHAXAL KOOB DHAXALTOOYADDA MARXUUM CABDI MAXAMUUD SHEEKH

Waxaa Maxkamada Yimid dhaxaltooyadda Marxuum Cabdi Maxamuud Sheekh waxayna ka codsadeen in loo Sugo dhaxal koobka dhaxaltooyadda aykka kooban yihiin 1. Maxamed Cabdi Maxamuud 2. Carafoow Cabdi Maxamuud 3. Maxamuud Cabdi Maxamuud 4. Luul Cabdi Maxamuud 5. Marxuum Cali Cabdi Maxamuud oo ka tegay Caruur qaan-Gaar ah dhammaantood kala ah 1. Ayaan Cali Cabdi 2. Maxamed Cali Cabdi 3. Abshir Cali Cabdi 4. Muuse Cali Cabdi 5. Cumar Cali Cabdi 6. Hani Cali Cabdi iyo Hooyadood Faduma Macaliin Cabdulle iyo Xaaska uu ka dhintay Marxuum Cabdi Maxamuud Sheekh oo ah Faaduma Fiidoow Dhiblaawe.


Dhaxaltooyaddu waxay dhaxleen oo uu uga dhintay Marxuum Cabdi Maxamuud Sheekh dhul Goof ah oo ku yaala Xamar Degmada Dayniile Soohdintiisu tahay Bari waxaa ka saaran Goofka Faay Raage, Galbeed waxaa ka saaran Goofka Reer Eeelay, Koofur waxaa ka mara Jid Caddahay Shirkaddaee Yooxaalow, Waqooyi waxaa ka saaran Goofka Guure Yalaxoow.

Dhulkaan Goofka ah in uu iska lahaay Marxuum Cabdi Maxamuud Sheekh iyo ay Tilmaanta Goofku sidaas tahay iyo in ay dhaxaltooyaddu intaas ~~intaas~~ Intaas tahay oo aysan soo bixi doonin wax qalad ahi waxaa ka marrag kacay kuna saxiixay Maxkamada horteeda Ragga kala ah:-


1. Sheekh Axmed Cali Afrax




2. Maxamed C/Qaadir Cali



3. Cabdi-Naasir Axmed Cali



4. Nuur Cusmaan Maxamed




Maxkamaduna waa ku ganacday waana Sugitaan Dhaxal Koob koob oo ansax ah oo waaafaqsan Shareecadda Islaamka iyo Xeerarka Dalka Maxkamaduna waxay ku qortay Diiwaankeeda Guud.

XOGHAYAHA GUUD EE MAXKAMADA

GURDOONIYAHA MAXKAMADA

XUSEEN JINGAALE KEESI

MIR SHEEKH AXMED MAC.XASAN (INDHA GIIR)

  
28/10/06



JAMHUURIYADA SOMALIYA

KU-MAXKAMADA ISLAAMKA DEGMADA WA DHIIGLEEY(XARARQYAALE)

MUW:Tr/28.10.2006

UJEEBO: CQDSI DHAXAL-KOQB

Anagoo Kala ah Dadka Hoos ku qoran Somali Wada ah Wada Degan Xamar Madiina Waxaana Si Wada Jiram Uga Codsameyna Maxkamada Shari'ata Leh In ay Noo Sameeyso Dhaxal-koob Nooguna Sameeyso Goof Kuyaala Degama Wa Daayniile Agagaarka Tabeelaha Shiikh Ibraahim Jihooyinkii-suna Waxa ay Ala Yihin Sidan.

1, Bari goofka Faay Raage 2-Galbeed Goofka Reer Eelaay 3-koofur ~~Abshir~~ Jid-cadaha Shirkada 4-Waqooyi Goofka guure Yalaxow Goofkaasi Waxaa Milkiyadiisa Iskalahaay Marxuum CABDI MAXAMUUD SHIIKH Waxa uuna Katagay Caruur dhan 3 wiil iyo 2 gabar iyo Hooyadood, Waana Dadkan hoos ku qoran oo hada Codsanaya Dhaxalkoobka Waxa ayna Kala Yihin.

SAXIIXAYAL

- 1, MAXAMAD CABDI MAXAMUUD Maxamed 2\* CARAFOON CABDI MAXAMUUD Carafoon
- 3, MAXAMUUD CABDI MAXAMUUD Muhammad Cabdi 4, LUUL CABDI MAXAMUUD Luul
- 5, MARXUUM CALI CABDI MAXAMUUD, oo katagay Caruur Gaangaar ah Dhamaartod oo Kala ah AYAAN CALI CABDI \_\_\_\_\_ MAXAMUD CALI CABDI Maxamed Cali
- Abshir Cali Cabdi Abshir Anuse Cali Cabdi \_\_\_\_\_
- Cumar ali Cabdi \_\_\_\_\_ Hani ali Cabdi \_\_\_\_\_
- Iyo Hooyadood Faaduma Macalin cabdule \_\_\_\_\_
- 6-Iyo Xaaska Uu kadhintay Marxuum Cabdi Maxamuud Shiikh oo ah FAADUMA FIIDOOW DHIMLAWE Faaduma

MARQAATIYAL

- 1, SHIIKH AXMED CALI AFRAX \_\_\_\_\_ 2, MAXAMUD CABDU-QADIR CALI Maxamed
- 3-CABDI-NAASIR AXMED CALI Naasir 4-NUUR CISMAN M/ED(CADAR) Nuur Cidar



**XAFIISKA DHAXALKA**  
**SI WAA FAQSAN**  
**KITAABKA IYO SUNNADA**  
Muqdisho - Somaliya

مكتب المواريث في الكتاب والسنة  
مقديشو - الصومال

المرجع 213/2025

التاريخ 1447/05/12 هـ الموافق 2025/11/03 م

**Dhaxalkii Cabdinuur Cabdullaahi Carab**

ماتت عن زوجة وابن و بنت 2/ منها أب وأم فلم تقسم التركة حتى ماتت الزوجة عن في المسألة ثم ماتت الأم عن ابن 3/ وبنت 4/ ومن في المسألة

لكل واحد	التركة		2	10		5	3		1	4		
	\$12,000.00	480	40	4		96	4		96	24		
-	-	-	-	-	-	-	-	ت	12	3	زوجة	1/8
\$4,000.00	\$4,000.00	160				32	2	ابن	26	13	ابن	ع
\$2,000.00	\$4,000.00	160				32	2	بنت/2	26		بنت/2	
\$2,500.00	\$2,500.00	100	10	1	1/4 زوج	16			16	4	أب	1/6
-	-	-	-	-	ت	16			16	4	أم	1/6
\$300.00	\$900.00	36	18	3	ابن/3	ع						
\$150.00	\$600.00	24	12		بنت/4							

**Dhaxalkii Cabdinuur Cabdullaahi Carab waa sidan:**

1. Maxamed Cabdinuur Cabdullaahi wuxuu leeyahay \$4,000.00 oo uu ka helay Aabihii Cabdinuur Cabdullaahi Carab iyo Hooyadii Jamiilo Axmed Cali
2. Muniiro iyo Muno oo aah ilmo Cabdinuur Cabdullaahi Carab middiiba waxay leedahay \$2,000.00 oo ay ka heshay Aabeheed Cabdinuur Cabdullaahi Carab iyo Hooyadeed Jamiilo Axmed Cali
3. Cabdullaahi Carab Maxamuud wuxuu leeyahay \$2,500.00 oo uu ka helay wiilkiisii Cabdinuur Cabdullaahi Carab iyo Zowjadiisii Faadumo Jimcaale Maxamed
4. Cali, Cumar iyo Xasan oo ah ilmo Cabdullaahi Carab Maxamuud midkiiba wuxuu leeyahay \$300.00 oo uu ka helay Hooyadii Faadumo Jimcaale Maxamed
5. Xabiibo, Xaliimo, Naciimo iyo Canab oo ah ilmo Cabdullaahi Carab Maxamuud middiiba waxay leedahay \$150.00 oo ay ka heshay Hooyadeed Faadumo Jimcaale Maxamed

**Marqaati**

1- Cabdinaasir Axmed Cali

2- Cali Daahir Axmed

Sh. C/casiis Maxamed Gaabow  
**Sheekha Dhaxley**






## FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 06/11/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Maxamed C/nuur C/laahi** oo ka Wakiil ah Iibsade **Omar Abdullahi Arab** Dukumiintiga **Original** Beeca Dhulka ee **Rep No. 1933/T.P.N/25, Tr. 03/11/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca Iibsadaha</b>	Omar Abdullahi Arab
<b>Cabirka</b>	20X30
<b>Ku Yaallo</b>	Muqdisho, Degmada Dayniile
<b>Lotto Lambar</b>	79-80-H
<b>W.M.L</b>	1932/T.P.N/25, Tr. 03/11/2025 Ka soo baxday Nootaayo Tayo
<b>Taariikhda Beeca</b>	03/11/2025
<b>La Socoto</b>	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

**Wakiilka Iibsade:** Aniga oo ah **Maxamed C/nuur C/laahi**, Leh Tel No. **0616653234**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Dhulka faah faahintiisu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Omar Abdullahi Arab**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Maxamed C/nuur C/laahi

*Amin*